


Wasaaradda Waxbarashada  
XARUNTA WAXBARASHADA  
DADKA WAAWEYN



**KAADIDHIIG**

# KAADIDHIIG

Buggan waxa qoray takhtar Saciid Ciidah  
waxana soo saartay Xarunta Horumarinta  
Bulshada ee Caalamka Carbeed, Sirsi Allayaan, Masar  
waxa Soomaali ku tarjumay Jaamac Maxamed Samakaab

Muqdisho 1982


Waxaa lagu Daabacay  
Xarunta Waxbarashada  
Dadka Waaweyn

## KAADIDHIIG

Kaadidhiigtu ubadkeenna way tamar daraysiisaa, waxayna ka xayubisaa (qaadaa) awoodda, firfircoonida iyo quruxda. Hannaanka koriimadoodana way hakisaa. Waxay halis u noqdaancudurro iyo jirrooyinfarabadan. Ka hor-tagga cudurkaasi wuxu dalkeenna ugu kacaa dhaqaale aad u farabadan. La-dagaalanka iyo ciribtiridiisana wuxu xil ka saaran yahay qof kasta oo Soomaali ah.

Kaadidhiigtu waa cudur guun ah. Waxay ku fidday adduunka intiisa badan. Waxaa loo malaynayaa in ay soo jirtay qarniyaal badan.

Kaadidhiigtu kuma cusba dalkeenna. Baaritaankii ugu horreeyey ee lagu xaqiijiyey jiritaanka kaadidhiigta dalkeenna wuxuu ahaa sannadkii 1936. Meelaha lagu arkey waxay ahaayeen agagaarka wabiyada iyo meelo ka mid ah waqooyiga Hargeysa.



Meelaha ay ku badan yihiin beeraha waraabku waxa ku badan kaadidhiigta.


Fididda kaadidhiigta waxa kaalin weyn ka qaata:

- durdurrada
- webiyada
- kellyada waraabka iyo
- biyo fariisinnada sida harooyinka iyo balliyada.




Cudurka kaadidhiigtu wuxu ka dhashaa dirxiyo midkiiba dhererkiisu yahay hal ilaa laba santimitir. Dirxiya-daasi dhedig iyo labba way leeyihiin.







Dirxiyadaasi waxay noloshooda, inta hore, ku qaataan xididdada beerkeenna. Beerka markay ku koraan waxay aadaan gidaarada kaadihaysta iyo mindhacirada iyagoo sii raacaya dhiiga. Halkaas ayaa dirxiga dhedigi ugu xanteeda dhigtaa.



Haddii qof kaadidhiig qabaa ku kaajo ama ku xaaro biyaha waxa saxaradiisa soo raaca ukumo. Ukumahaasi waxay ku dillaacaan biyaha. Dirxiyada ka soo baxa ukumaha ayaa biyaha dabaasha.




Dirxi kastaaba wuxuu raadsadaa xaaxey gaar ah. Haddii dirxigu helo xaaxeyda uu rabey, wuxuu ka dusaa hāra-geeda. Ka dib wuxuu tagaa beerka xaaxeyda. Dhibaato xoog leh ayaa soo gaarta xaaxeyda uu dirxi beerka kaga jiro.




Dirxi waliba wuxuu ku tarmaa beerka xaaxeyda. Midkiiba wuxuu u qaybsamaa kumanyaal kale. Dirxi kasta waxaa ku dahaaran xuub.







Ugu dambeystii waxaa dillaaca xuubabkii ku dahaarnaa. Halkaasna waxaa ku dhinta xaaxeyda. Ka dibna dirxiyadii ayaa ka soo baxa xaaxeyda, waxayna dabaashaan biyaha.



Haddii aan dirxiyadaas aad u yar-yar ku eegno aalad muuqaalka weynaysa, waxan arkaynaa in dirxi waliba leeyahay dabo labo farraar ah. Farraarahaas bay ku dabaalataa marka ay ugaarsi tegeyso. Wuxu dirxigu galaa dadka aan ka digtoonayn ee dhex galawebiyada iyo harooyinka.



Haddii qof warmooqe ahi galo biyaha waxa weerar ku soo qaada oo oogadiisa ku dhega dirxiyada. Marka uu biyaha qofku ka baxo, dirxigu wuxuu dalooliyaa maqaarka. Wuxuu qofku dareemaa cuncun. Dirxiyadaasina waxay raacaan xididdada dhiigga. Waxay tagaan sambabada ka dibna beerka. Halkaas ayey ku noolaa- daan oo ku koraan dhiigga iyo dheecaanka dadka. Marka korrimadoodu u dhammaato waxay u gudbaan kaadi- haysta iyo mindhicirka. Halkaas ayey dhigaan ukuma- hooda. Meertada noloshooduna dib ugu bilaabataa.




Dhibaatooyin ba'an ayaa kaadidhiigtu jirkeenna u  
geysataa. Ukun waliba waxay darbiyada mindhicirka  
iyo kaadihaysta ku samaysaa nabarro dhiiga.  
Dhiiggu waxa uu soo raacaa, oo lagu arkaa kaadida.  
Waxa meelaha ay ukuntu ku qaraxday ku hara dhagxaan.  
Waxay dhagxaantu u gudubtaa kelyaha iyo kaadihaysta  
oo uu waqti ka dib qofku ka xanuunsado.





Waxa suurtagal ah in ay dhagxantaasi awddo kaadi-  
mareenka. Kelyuhuna jirradaan lagana maarmi waayo  
in keliyaha la qalo. Waxaa kaloo suurto gal ah in  
nabarradu caabuuqaan ama caaliraan. Markaas oo qofku  
uu had' iyo jeer moodo in kaadiyi hayso. Hafeef  
xannuun leh ayuu kaadihaysta ka dareemaa. Kaadida  
qofkana waxaa soo raaca dhiig.

Caalirka kaadihaysta ka bilaamay wuxu ku fidaa  
kelyaha. Kelyuhuna waqti ka dib bay qurmaan.




WAA JEEH KELLI AH  
KAADIMAREENKIINA XIRANYAHAY

Haddii uu cudurku ku sii raago kaadihaysta waxa ku dhasha cudurka loo yaqaan kansarka. Cudurkaas oo ah mid qofka ku dili kara lix bilood gudahood. Haddii uusan kansarku qofkaas kuba dhicin, taagdarida, dhiig-yarida, oolka kaadihaysta, kaadimareenka iyo kelyaha ayaa u sahla cudurrada halista ah inuu qofku u adkaysan kari waayo. Cudurradaasoo u horseeda dhimashadiisa isaga oo dhallinyar. Badiba waxay kaadidhiigtu dhawacdaa beerka iyo mindhicirka. Qofka qaba kaadidhiigta beerkiisu wuu ururaa, beeryaradiisuna way barartaa. Intaa ka dib qofku wuu caloolfuuraa, halkaas ayuuna ku dhintaa.




Waxaynu soo aragnay meerta-nololeedka kaadidhiigta in ay u egtahay silsilad. Ukumuhu waxay soo raacaan kaadida iyo saxarada qofka. Waxayna ukumuhu ku dillaacaan biyaha. Dirxiga ukumaha ka dillaacaa wuxuu raadsadaa xaaxeeyo. Muddo ayuu ku negaadaa xaaxeeyada. Marka uu ka baxana wuxuu raadsadaa dad.



Meerto nololeedka kaadidhiigtu waa sida silsilad  
afafkeedu is-haysto. Silsiladaas haddii la kala  
jaro waxaa halkaas ku istaagaaya kaadidhiigtii fidi  
lahayd.






Waxa si sahlan cudurkaas looga badbaadi karaa iyadoo  
aan agagaarka webiyada iyo biyo fariisannada lagu  
saxaroon ama lagu kaadshin.



Waxa habboon in uu qof waliba gurigiisa ka dhisto musqul asturta saxarada. Markaas wuxuu ka nabad gelayaa kaadidhiigta iyo cudurro farabadan oo kale.



Waxaa kaloo cudurka lagaga foojignaan karaa:

- biyo fariisinnada iyo durdurrada oo aan la dhex marin.
- biyo fariisinnada iyo durdurrada oo dhar lagu dhaqan.




Biyo la kariyey ama laga keenay ceel asturan baa ku habboon cabbitaan iyo weel ku dhaqasho iyo mayrashaba.






Dharkana ha lagu dhaqdo biyo aan lagu tuhmayn  
Kaadidhiig.



Xoolaha laga waraabinaayo durdurrada iyo biyo  
fariisinnada yaan lala gelin biyaha.



Sidaas ayuun baynu ku cidhibtiri karnaa meertada nolosha ee kaadidhiigta. Waxa habboon inuu qof kasta oo inaga mid ahi iska daaweeyo cudurka kaadidhiigta haddii uu qabay. Hadday taasi dhacdo qof jirran laynauma arkeen, biyahana cudurka laguma reebeen.




Daaweyntaasi waxay jirkeenna u soo celisaa dhiigiisii  
ka lumay..





Waxa dib ugu soo noqda dhallinyarada taagtoodii iyo  
tamartoodii ay hore uga lumisay kaadidhiigtu.



Waxay quruxdu ku soo noqotaa wejiyadii ay baabiisay  
kaadidhiigtu.




Ka hortagga kaadidhiigtu waa xil saaran qof kasta oo ka mid ah bulshada, waayo waxa dalkeenna kaga baxa dhaqaale aan la soo koobi karayn oo dhaawaacaya kor uqaadidda dhaqaalaha dalka.



Tirada dadka u dhinta kaadidhiigta ma yara.





Xabaalihii  
Kaadihiiga

Waxa xil inaga saaran yahay la-dagaalanka cudurkaas  
foosha xun, innagoo isticmaalayna musqulaha, daryeel-  
ka caafimaadka, iyo ka fogaanshaha ku-saxaroodka biya-  
mareenada deegaankeenna, si uusan cudurku u faafin.



